



Bixinta Dheeraadka Ah ee MFIP, GA, MSA iyo SNAP

MFIP, GA, MSA and SNAP Overpayments

Maxay tahay bixin dheeraad ah?

“Bixin siyaado ah” waxa weeye marka uu wakiilku shaqo sheego in aad qaadatay gargaar ka badan intii aad heli lahayd. Bixin siyaado ah waxay dhici kartaa haddii aadan shaqaalaha u soo sheegin marka aad hesho dakhli ama macluumaad kale isla markiiba, ama waqtiga ku haboon. Wakiilka degmadu waa kaa soo celin karaa wixii siyaado ah ee lagu siiyay waayo si sax ah uma soo sheegin siyaadada.

Bixin siyaado ah waxay kaloo dhici kartaa marka uu wakiilka uu khalad sameeyo marka uu xisaabinayo gargaarkaaga. Xitaa haddii bixinta siyaadada ah ee la xiriirta SNAP, MFIP aysan ahayn khalad adiga kaa timid, sharcigu wuxuu siinaya wakiilka degmada in uu kaa soo celiyo inta siyaadada ah ee lagu siiyay.

Haddii DHS ka Minnesota ay go'aansato in qofka si macquul ah u fekeraya garran karo in khalad dhacay, wixii lacag caddan ah ee gargaarka MFIP, GA, MSA ee lagu siiyay, sharcigu wuxuu qabaa in lagaa soo celiyo keliya wixii siyaado ah ee si qalad ah wakiilka degmadu kuu siiyay. Tusaale, lacagta lagu siiyay waxay si aad ah uga badantahay intii aad heli jirtay, oo aad garan kartid in ay khalad tahay. Tani sidoo kale waxa ay quseeysaa bixinada lacagta dheeraadka ah ee barnaamijka gargaarka haynta ilmaha (CCAP).

Waxaa laga yaaba in aad ku wareerto ogaysiinta bixinta siyaadada ah. Wac [xafiiska gargaarka sharciga](#) haddii aad su'aalo ka qabtid in aad dib u soo celiso bixinta siyaadada ah oo ku timid khalad aadan adigu lahayn.



Haddii aadan fahmin sida wakiilka degmadu u xisaabiyay xaddiga siyaadada ah, la hadal shaqaalaha maaliyadda si uu kuu siiyo qoraal xisaabeed. Xisaabtu waxay muujinaysaa inta lacag ah ee aad qabtid bil kasta oo dheeraad lagu siiyay, iyo bilaha ay ahaayeen.

Haddii shaqaalaha maaliyaddu uusan ku caawimi karin, la hadal horjoogaha shaqaalaha oo weydii faahfaahin dheeraad ah ee xisaabta.

Side racfaan uga qaadan karaa bixin siyaado?

Haddii aad u malaynayso in aan lagu siin wax siyaado ah, oo aadan ku raacsanay tirsiga lagu sheegay in lagu siiyay ama aad u malaynayso in aysan ahayn in aad celiso gaargaarka siyaadada ah ee aad heshay, waxaad xaq u leedahay in aad racfaan qaadatid. Racfaankaagu waa in uu yahay qoraal.

Haddii bixinta dheeraadka ah ay ka timi MFIP, GA ama MSA waxaad haysataa **30** maalmood in aad racfaan ku qaadatid, laga bilaabo taariikhda ogaysiinta **kowaad** aad heshay. Haddii aad racfaam ka qaadatid bixin siyaado ah ee ka timi MFIP, GA ama MSA 30 maalmood ka dib, laakiin aan la gaarin 90 maalmood, waa in aad caddaysaa sababta daahitaanka keentay.

Bixinta siyaadada ah ee SNAP, waxaad haysataa **90** maalmood laga bilaabo taariikhda aad heshay ogaysiinta kowwad ee racfaanka. Ogaysiiskani waxa uu ku siin akhbaar ku saabsan sidda racfaanka loo qaato.

Inta aad sugayso xisaabta, ka taxadar in ay ku dhaafto waqtiga kama dambaysta ah ee racfaan qaadashada.

Waxa aad booqan kartaa [buuxinta iyo soo gudbinta foomka racfaan ka qaadashada](https://mn.gov/dhs/). Soo booq: <https://mn.gov/dhs/>.



- Guji halka “How do I” sanduuqa bogga xagiisa sare
- Hoos “Find” guji halka “edocs and forms”
- Guji luqadaada
- Ku qor 0033 barta baaritaanka

Waaxaa kaloo jira tilmaan bixiye, haddii aad rabto in aad akhriso. Si taxadar leh u akhri foomka, buuxi dhamaantiis kadibna guji "Submit" dhanka hoose ee midig. Waxaa wanaagsan in aad koobi ka daabacatid.

Haddii aadan rabin in si toos ah (xiriir) ah u samaysid racfaanka, qor warqad aad ku sheegayso waxa aad u malaynayso in khalad ku jiro sheegashada bixinta siyaadada ah. Ku qor warqadda tirsiga dacwadaada. Koobi kala har.



U dir warqadda : MN Department of Human Services
Appeals Office
PO Box 64941
St. Paul, MN 55164-0941

AMA fakis ku dir. Fakiska xafiiska racfaanka ee gobolka waa (651) 431-7523. Meel dhigo caddaynta fakiska.

Waxaa fiican in aad koobi racfaanka ah u dirtid shaqaalaha maaliyadda.

Maxaa dhici kara haddii aanan racfaan qaadan?

Haddii aadan racfaan ka qaadan bixinta siyaadada ah, ama (ay ku dhaaftay taariikhdiis ugu dambaysa ee racfaan la qaadan karay), siyaadada aad qaadatay waa kugu waajibtay. Taas

micneheedu waxa weeye gobolku waa kaa soo celin karaa lacagta siyaadada ah ee aad qaadatay. Waxay sameyn karaan mid ka mid ah 3da hab:

- Haddii aad bixin siyaado ah ka heshay MFIP, GA or MSA, ama SNAP, waxa gobolku marba in yar ka jarayaa bil walba deeqda lagu siiyo si lagaaga soo celiyo siyaadadii. Tan waxaa loo yaqaan “khasaara celin.”
- Haddii aadan waxba hadda ka qaadan MFIP, GA ama MSA, ama SNAP, waxaad samayn kartaa qorshe aad bishiiba wax yar ku bixiso ilaa ay dhamaato.
- Mararka qaarkood gobolku wuxuu samayn karaa hab loo yaqaan dib u soo celinta dakhliga “revenue recapture” oo ay wax ka goosanayaan cashuurta kuu soo noqta, lacag celinta markaad wax gadatid, iyo waxa aad ka hesho bakhtiyaa nasiib, si ay siyaadadii kaaga soo celiyaan. Fiiri xogta urursan [Marka Ay La Haraan Cashuurta Gobolka Kaaga Soo Noqon Laheyd.](#)



Inta badan gobolku qofka mushahaarkiisa waxba kama goostaan, laakiin awood bay u leeyihiin haddii ay go’aankaas gaaraan. Haddii gobolku rabo in ay saas yeelaan, waa in ay kuu soo diraan macluumaad ku saabsan xaqaaga, iyo waxa ka reeban in ay hantidaada qabsadaan. Fiiri xogta urursan [Qafaalashada Mushahar/Xisaabta Bankiga Iyo Xuquuqda Aan Leeyahay.](#)

Ma waayi karaa gargaarkayga?

Dacwadaha la xiriira bixinta siyaadada ah, wakiilka degmadu wuxuu isku dayi karaa in uu qofka ka joojiyo gargaarka. Tan waxaa loo yaqaan “U qalimid la’aan Maamulku gaaray.” Fiiri xogta urursan [Dhaqsiya dacwadda been abuurka daryeelka dadweynaha \(cayrta\).](#)

Si ay kaaga joojiyaan gargaarka waa in ay dhegeysiga dacwadda ku caddeeyaan in aad barnaamijka gargaarka ku samaysay khiyaano si ula kac ah. Waxaa laga yaabaa wakiilka degmadu in uu ku weydiisto in aad saxiixdo ka tanaasulid xaq aad u leedahay dhegeysi oo aad aqbasho u qalimid la’aan. Haddii aad tan saxiixdo, mar dambe waa isbedeli kartaa, waana weydiisan kartaa dhegeysi. **LAAKIIN**, waa in aad qoraal ku weydiisataa, wakiilka degmaduna waa in codsigaaga helaa ka hor:

1. Inta aadan ka soo bixin shuruudaha aysan bilaaban ama
 2. 30 maalmood gudohood taariikhda aad saxiixday ka haridda
- hadba kii soo horeeya.

Si taxadar leh uga fikir ka hor inta aadan go’aansan in aad saxiixdo tanaasul iyo in kale.

Maadaama wakiilka degmadu isku dayayo in uu caddeeyo in aad khiyaano samaysay, ha kala hadlin dacwadaada shaqaalaha degmada u qaabilsan arrimaha been abuurka (khiyaamada). Waxay si lidi kugu ah u isticmaali karaan wax kasta oo aad tiraahdo, marka waxaa kuu fiican in aadan la hadlin. Haddii shaqaale degmada u qaabilsan been abuurka uu gurigaaga yimaado,

gudaha ha soo gelin. Sidoo kale shaqaalaha maaliyadda ha kala hadlin waxyaabo ku saabsan bixin siyaado ah.

Wakiilka degmadu waxaa laga yaabaa in uu kugu dacweeyo (kaa xereeyo) fal dambiyeed been abuur ah haddii uu u maleeyo in aad khiyaamo samaysay. Gargaare sharci yaqaan ah ma galo arrimaha la xiriira fal dambiyeed. Waxaad u baahantahay in aa la xiriirto sharci yaqaan fal dambiyeed, haddii lagugu soo oogo fal dambiyeed ku saabsan been abuur aad ka samaysay badbaadada dadweynaha.

Hel Caawin

Degmada Hennepin, Wac xarunta xuquuqdaada sharciga ah (612) 337-0030 ama u qaybsanaha Difaaca dadweynaha degmada Hennepin (612) 348-7530.

Degmada Ramsey, wac xarunta cadaaladda xaafadda (651) 222-4703 ama Difaaca Dadweynaha (651) 757-1600.

Dgemooyinka kale, la xiriir xafiiska qareenada dadweynaha ee degaanka ama codso qareen marka aad timaado maxkamadda.



Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen. Ha isticmaalaan xogtan urursan haddii ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.

© 2022 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.